



Waanu ku faraxsanahay in aan idinla kulano!



Soo Dhawaada!

Waxbarashada Bulshada ee Faribault waa goob dhexe oo isku xirta waalidiinta iyo qoysaska iyo adeegga bulshada si wax looga qabto baahida jir ahaaneed, bulsho, iyo waxbarasho. Waxa ay ka caawiyaan waxbarashada iyo in qoysasku helaan caawinaad oo guuleystaan.

Laba goobood!
Dugsiga Hoose ee Jefferson iyo Dugsiga Dhexe ee Faribault



“Waxaanu u diyaarinaa degaan amaan oo ilmuhu ku barbaaro ugana qeyb qaataan waxbarashada ee ka baxsan tan dugsiyada ee caadiga ah oo la dhiiri geliyo in ay dareemaan in ay ka tirsan yihiin”

Nick Jurens, Maamulaha Dugsiga Hoose ee Jefferson




“Dugsiyadeenu waxa ay soo bandhigaan fursado ardayda isku xirta oo ay ku aaminaan dadka waaweyn, taasoo u ogolaaneyso in xiriirku ku kabco ka baxsan fasalka”

Stacy Fox, Maamulaha Dugsiga Dhexe ee Faribault



Amber James • La Shaqeyaha Xiriiriyaha Dugsiyada Bulshada Dugsiga Hoose ee Jefferson



Jacqueline Ramirez Cisneros • La Shaqeyaha Xiriiriyaha Dugsiyada Bulshada Dugsiga Hoose ee Jefferson




Nora Schulz Xiriiriyaha Dugsiyada Bulshada Dugsiga Dhexe ee Faribault

Dhaqaalaha hawlgalka aasaasiga ah ee Waxbarashada Bulshada ee Faribault waxaa laga bixiyaa Deeqda Waaxda Waxbarashada ee Minnesota Nita M. Lowery 21st Century iyo Maamulka Waaxda Waxbarashada Faribault iyo deeqda Ignite Afterschool ee ay maamusho Waaxda Waxbarashada ee gobolka Minisoota oo adeegsanaya deeqda Dawladda federaalka, CFDA 84 425U, Qorshaha Badbaadinta Ameerika, Gargaarka Dhaqaale ee Degdegga ah ee Dugsiyada Hoose iyo Sare.

**Provisión de fondos de Siglo 21 no constituye aprobación del Departamento de Educación de los EU.*




Waxbarashada iyo Xalinta dhibaatooyinka



Wax badan ayaa halkan ka socda!

Fursado badan ayaa jira Dugsiyada Bulshada ee Faribaul oo qoyska oo dhan ka qeyb qaadan karaan sanadka 2022-2023! Saacadaha dheeraadka ah ayaa barnaamijyadeena iyo dhaqdhaqaaqyada kale ayaa qoysaska fursad u siinaya jadwalka kala duwan.

Ardayda Dugsiga Hoose ee Jefferson iyo Dugsiga Dhexe ee Faribault waxa ay ka qeyb qaataan naadiyo iyo waxyaabo kale oo la qabto saacadaha waxbarashada ka dib si loo baro xirfado cusub iyo waxyaabaha ay jecel yihiin—waxaa ka mid ah cuno karinta, casharo dabaasha ah, naadiyada heesaha, durbaanleyda, iyo habeenka Jimcaha ee jimicsiga ardayda oo dhan u furan.



#weare faribault

Tirada ardayda
ka qeyb qaadatay
barnaamijyada
50+ saacadood
sanadka oo dhan

291

Ardayda fasalka 8aad ee
ka qeyb galay ugu yaraan
mid xiso oo barnaamijyada
Dugsiyada Bulshada

141

Naadiyada
loo soo
bandhigay

140

Ardayda ka
qeyb gashay
ugu yaraan
1 xiso oo
barnaamijyada
Dugsiyada
Bulshada

834

Tirada ardayda
Dugsiga Hoose ee
Jefferson ee ilkaha
laga daweeey iyada
oo lala kaashaday
HealthFinders
Collaborative

40+

Tirada ardayda ka
qeyb gashay ugu
yaraan hal mar
barnaamijyada
Dugsiyada
Bulshada (*dugsiga
hoose ilaa sare*)

37,612

Tirada ardayda
la siiyey cuntada
sanad dugsiyeedka
2022-23

Wargelin

Lyada oo miisaaniyadda Dugsiyada Bulshada loo qorsheeyey ilaa Agoosto 2023, Maamulka Waxbarashada ee Faribault iyo Health Community Initiative (HCI) waxaa dhawaanta lagu abaalmariyey deeq cusub oo aad loogu tartamay oo ay bixisay 21st Century Community Learning Center ee Waaxda Waxbarashada ee Minisoota. Taasi waxa ay u ogolaaneysaa in la sii wado Hawlaha ay Dugsiyada Bulshada ka wadaan Dugsiga Hoose ee Jefferson iyo Dugsiga Dhexe ee Faribault, iyo adeeg dheeraad ah oo loo qabto ardayda Dugsiga Hoose ee Rosevelt, dugsiga Dhexe ee Linclon, iyo Dugsi Sare ee Faribault, oo bilaabanaya 2023-24.

Xogta



Lagu daray jaceylka waxbarashada

“Waxaa jira waxyaabo badan oo ardaydu ka qeyb qaadan karaan, waxaanu sidoo kale ka caawinaa waxbarashada! Hadafkeenu waa in ay ardaydu waxbarashada ka qeyb qaataan oo loo abuuro sabab ay ku jeclaadaanugsiga”

– *Jacqueline Ramirez Cisneros,*
La Shaqeeyaha Xiriiriyaha
Dugsiyada Bulshada
Dugsiga Hoose ee Jefferson

